



## Siyaasadda Takoor La'aanta Nondiscrimination Policy Statement (Somali)

### Qoraalka Wuxuu Quseyaa:

Mayo Clinic

### Baaxadda

Qof kasta, marka takoorka ku saleysan yahay isirka, midabka, caqiidada, diinta, lab/dhedig, xaaladda guurka, ahaashada lab/dhedig, aqoonsiga lab/dhedig ama sheegidda, xaaladda ciidanka, xaaladda la xariirta qaadashada kaalmada dadweynaha, asal qaran, cuuryaannimo, ama da'da gelitaanka, ka qeybgalka, ama helitaanka adeegyada iyo manaafacaadka sida hoos timaado barnaamijyadeeda iyo hawlaheeda.

### Ujeedada

Si loo hubsado u hoggaansamida sharciyada Federaalka iyo Gobolka ee mamnuuca takoorka.

### Qaraarka Siyaasadda

Bacdamaa aad tahay qof qaata kaalmada maaliyadda Federaalka, Mayo Clinic meesha kama saarto, qofna uma diido manaafacaad, ama qofna kuma sameyso takoor ku saleysan isirka, midabka, caqiidada, diinta, lab/dhedig, xaaladda guurka, ahaashada lab/dhedig, aqoonsiga lab/dhedig ama sheegidda, xaaladda ciidanka, xaaladda la xariirta qaadashada kaalmada dadweynaha, asal qaran, itaal darri, ama da'da gelitaanka, ka-qeybgalka, ama qaadashada adeegyada iyo manaafacaadka sida hoos timaado barnaamijyadeeda iyo hawlaheeda, haddii ay Mayo Clinic si toos ah u fulliso ama u xil saarto qandaraasle ama hay'ad kasto oo kale ay Mayo Clinic la qorsheyso barnaamijyadeeda iyo hawlaheeda.

### Tixraacyada

Oraahdaan waxay waafaqsan tahay qodobada sharciga Cutubka VI Sharciga Xuquuqda Madaniga (Title VI of the Civil Rights Act) 1964, Qeybta 504 Sharciga Dayactirka (Rehabilitation Act) 1973, Sharciga Takoorka Da'da (Age of Discrimination Act) 1975, iyo Sharciyada Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Aadanaha Mareykanka ee la soo saaray sida waafaqsan sharciyadaan Cutubka 45 Xeerka Sharciyada Federaalka, Qeybaha 80, 84, iyo 91 (Title 45 Code of Federal Regulations Parts 80, 84, and 91).

Haddii aad qabtid su'aalo, fadlan la xariir Maamulaha Waayaha Bukaanka (Patient Experience Managaer) ama Iskuduwaha Qeybta 504 (Section 504 Coordinator):

Mayo Clinic, Arizona – Telefoonka: 480-342-3506 ama TDD/Isgaarsiinta Arizona (Arizona Relay): 711 ama 800-367-8939

Mayo Clinic, Florida – Telefoonka: 904-953-2019 ama TDD/Isgaarsiinta Florida (Florida Relay): 800-955-8770

Mayo Clinic, Rochester – Telefoonka: 507-284-4988 or TDD/Isgaarsiinta Minnesota (Minnesota Relay): 711 ama 800-627-3529

Siistemka Caafimaadka Mayo Clinic (Mayo Clinic Health System), Koofur Bari Minnesota – Telefoonka: 715-464-3100 ama TDD/Isgaarsiinta Minnesota (Minnesota Relay): 711 ama 800-627-3529

Siistemka Caafimaadka Mayo Clinic (Mayo Clinic Health System), Koofur Galbeed Minnesota – Telefoonka: 507-385-5848 ama TDD/Isgaarsiinta Minnesota (Minnesota Relay): 711 ama 800-627-3529

Siistemka Caafimaadka Mayo Clinic (Mayo Clinic Health System), Waqooyi Galbeed Wisconsin – Telefoonka: 715-838-5017 ama TDD/Isgaarsiinta Wisconsin (Wisconsin Relay): 711 ama 800-947-6644

Siistemka Caafimaadka Mayo Clinic (Mayo Clinic Health System), Koofur Galbeed Wisconsin – Telefoonka: 608-392-9478 / 800-362-5454 khadka 2-9478 ama TDD/Isgaarsiinta Wisconsin (Wisconsin Relay): 711 ama 800-947-6644

Siistemka Caafimaadka Mayo Clinic ee Waycross - Telefoonka: 912-287-2567 ama TDD/Isgaarsiinta Georgia: 800-255-0135

## La Xariir

Xafiiska Sinaanta Caafimaadka iyo Ka Qeybgelinta (Office of Health Equity and Inclusion)

## Waxaa Ogolaaday

Mayo Clinic – Guddiga Dhaqan-gelinta Caafimaadka (Clinical Practice Committee)